Gogoldhig ku saabsan Xeerka Xannaanaynta Carruurta ee 2004 (Care of Children Act 2004).

Hordhac

Xeerka Xannaanada Carruurta ee 2004 wuxuu dhaqan gelayaa 1da bisha toddobaad ee sannadkan 2005. Xeerkani wuxuu beddelayaa Xeerka kafaalaqaadka ee 1968.

Xeerkani wuxuu waxyaabo muhiim ah ka beddelayaa sharciyada la xiriira –

- kaafalaqaadka (guardianship) carruurta
- heshiisyada xannaanaynta carruurta, iyo
- xallinta khilaafyada ka dhasha heshiisyada wadaagga xannaanada carruurta.

Xeerkani wuxuu sharciga ka dhigayaa mid waafaqsan masuuliyedda waalidiinta ka saaran ilmahooda.

Xeerku wuxuu kaloo garawsan yahay in maalmahan dambe carruurta Niyuusiilaan lagu barbaariyo noocyo badan oo isafgarasho qoys ah.

Waxyaabaha xeerkani sharciga ka beddelay waxaa ka mid ah in uu

Xeerkani –

- muhiimadda saarayo xuquuqda carruurta
- dhiirri gelinayo iskaashi waalidnimo
- tixgelinayo noocyada badan ee heshiisyada qoyska haatan jira ee la xiriira xannaanaynta carruurta
- hufnaan ku biirinayo habka ay u shaqayso Maxkamadda Qoysku (Family Court), iyo
- Maxkamadda siinayo fursado dheeraad ah markay wax ka qabanayso jebinta amarrada Maxkamadda.

XEERKA XANNAANAYNTA CARRUURTU WUXUU KOBCINAYAA DARYEELKA IYO DANAHA CARRUURTA

Waxaa xoogga la saarayaa xuquuqda carruurta

Xeerka Xannaanaynta Carruurta ee 2004 wuxuu **daryeelka ilmaha** ka dhigayaa waxa ugu muhiimsan. Wuxuu kaloo xoogga saarayaa in carruurta **laga talogeliyo** go'aamada iyaga saamaynaya, iyo in weliba go'aamada ilmaha saamaynaya la qaato, lana meel mariyo xilli ku habboon garashada waqtiyeed ee ilmaha.

Sidoo kale xeerku wuxuu ahmidyedda ka weecinayaa **xuquuqda** waalidka, wuxuuna u weecinayaa dhanka **mas'uuliyedda** waalidiinta ka saaran carruurtooda.

Ilmaha ayaa mudnaanta koowaad leh

Xeerka cusub wuxuu carrabka ku adkaynayaa in **daryeelka iyo danaha carruurtu** yihiin kuwa ugu horreeya uguna muhiimsan marka la eegayo khilaaf kasta ee iyaga ku saabsan.

Wuxuu soo bandhigayaa qodobbo muhiim ah oo ay tahay in Maxkamaddu tixgeliso markay go'aan ka gaadheyso waxa carruurta u wanaagsan –

- waalidka iyo kafiillada carruurtu waa inay qaadaan mas'uuliyedda weyn ee xannaanayntooda, waana inay heshiis ka gaadhaan daryeelkooda, horumarkooda iyo korintooda
- waa in lasii wado heshiisyada la xiriira xannaanada ilmaha, horumarkiisa iyo korintiisa
- waa in la dhowraa lana xoojiyaa xiriirka ilmaha iyo qoyskiisa ama xigtadiisa kale
- waa inay iskaashadaan waalidiinta, kafiillada iyo dadka kale ee ku lugleh xannaanaynta carruurta
- waa in la sugo ammaanka ilmaha oo laga badbaadiyo nooc kasta oo shaqaaqooyin ah, iyo
- waa in la dhowro lana xoojiyo isirka ilmaha (identity), gaar ahaan dhaqankooda, afkooda hooyo iyo diintoda.

Dhegeysiga (tixgelinta) hadalka ilmaha

Go'aamada ku salaysan Xeerka cusub ee ay Maxkamadda Qoysku gaadho waxaa laga yaabaa inay saamayn xoogleh ku yeeshaan nolol maalmeedka ilmaha iyo xiriirka mustaqbalka fog ay la yeelanayaan waalidkood. Xeerka cusubi wuxuu xoojinayaa baahida loo qabo in ilmaha ku lug leh dacwad Maxkamadda Qoyska uu helo fursad maangal ah oo ay ku sheegan karaan siday iyaga la tahay in wax u dhacaan – tusaale ahaan, cidday doonayaan inay la noolaadaan. Waa in Xaakimku tixgeliyaa ra'yiga ilmaha markuu go'aanka gaadhayo.

Garyaqaan ilmuhu leeyahay

Sida ku cad Xeerka cusub, Maxkamadda Qoysku waxay sii wadi doontaa in garyaqaan u gaar ah ilmaha loo qabto haddii ismaandhaaf iyaga saamaynaya ay u dhowdahay in Maxkamadda loo gudbiyo.

Hawsha garyaqaanku waa inuu –

- ilmaha matalo inta Maxkamaddu socoto kana qaybqaato wada xaajood kasta oo waalidkood dhexmara
- fahmo aragtida ilmaha lana socodsiiyo Xaakimka
- xaqiijiyo in lasoo bandhigo maslaxadda ilamaha iyo wax walba oo daryeelkooda saamaynaya si Maxkamaddu tixgelin u siiso
- u sharxo ilmaha sida Maxkamaddu u dhacayso, iyo ugu dambayn go'aanka Xaakimku qaato.

Macluumaad dheeraad ah ka eeg qoraalka (pamphlet) **Lawyer for the Child** (**Garyaqaan Ilmuhu leeyahay)**.

Carruurtu racfaan way ka qaadan karaan go'aamada Maxkamadda Qoyska ee iyaga saameynaya

Xeerku wuxuu ilmaha xaq u siinayaa inay racfaan ka qaataan inta badan go'aamada ku salaysan Xeerkaan ee iyaga saamaynaya– tusaale ahaan, parenting orders (amarrada waalidnimo).

Garyaqaankooda ayaa u sharxaya ilmahu xaqa ay u leeyihiin inay racfaan qaataan. Garyaqaanku wuxuu ilmaha ka caawinayaa inuu racfaan qaato hadday taasi tahay waxa ilmuhu doonayo.

Carruurtu waxay Maxkamadda weydiisan karaan in dib loo eego go'aamada waalidka iyo kafiillada

Haddii ilmo 16 jir ah ama ka weyni uusan ku qanacsanayn go'aan muhiim ah oo waalidkood ama kafiilkoodu iyaga ka gaadhay, ilmuhu wuxuu Maxkamadda Qoyska weydiisan karaa inay iyadu arrintaas go'aan ka gaadho.

Kafiilnimo (Guardianship) waxay ku egtahay 18 jir

Kafaalaqaadka ilmuhu wuxuu ku egyahay markay gaadhaan 18 jir (taasoo horay u ahayd 20 jir). Sidoo kale kafiilnimadu way joogsaneysaa haddii ilmo 16 jir ama 17 jir ahi guursado, ama yeesho reer ku salaysan civil union (waa heshiis ay si rasmi ah ama sidii dad isqaba ugu wada nool yihiin laba qof), ama bilaabo xaalad guur lamood ah oo aan

meher ku dhisnayn(de facto relationship). (Si ay arrimahaasi ugu suurto galaan, waxaa loo baahan yahay inay ruqsad qoraal ah ka haystaan waalidkood ama cidda ka masuulk ah).

Da'da 18 sano jir waxay waafaqsan tahay heshiisyeda caalamiga ah ee New Zealand gashay sida kan Qarammada Midoobay ee Xuquuqda Carruurta.

Dhiirri gelin waalidnimo iskaashi ku dhisan

Waxa loo danleeyahay "xuquuq" maahee waa "mas'uuliyed"

Xeerka cusubi wuxuu ahmiyedda siinayaa **mas'uuliyedda** labada waalid ilmahooda ka saaran, marka la barbar dhigo **xuquuqdooda** waalidnimo.

Erayada loo adeegsaday Xeerka cusubi waxay muujinayaan isbeddelkaas. Halkii markii hore ahayd in waalidku leeyahay **gacan kuhaynta** (custody) ilmaha, Xeerka cusubi wuxuu qabaa in doorka waalidku yahay **xannaanaynta maalinba maalinta ka dambeysa** ee ubadkooda. Labada waalid waxaa suurtowda inay wadaagaan xannaanaynta maalin walba ah, iyagoo waqtiga u kala qaybsanaya sida ku habboon carruurtooda iyo duruufaha qoyska.

Waalidkii aan ku lug lahayn xannaaynta joogtada ah ee ilmaha, waxaa lagu boorrin doonaa inuu xiriir la sameeyo ilmaha. Tan waxaa markii hore loo yiqiin fursad **access** (u imaansho).

Xeerkani wuxuu ku beddelay amarrada gacan kuhaynta (custody orders) iyo kuwa u imaatinka(access orders) **parenting orders (amarrada waalidnimo)**.

Waalidnimo – waa door joogto ah

Wuxuu Xeerkani sidoo kale xoogga saarayaa in mas'uuliyedda waalidku tahay mid **joogto ah**. Marka waalidiintu kala tagaan (is-furaan) waa in labadooduba sii wadaan inay door muhiim ah ku yeeshaan korinta ubadkooda, xataa haddii midkood uusan carruurta la noolayn.

Dhiiri gelin in waalidiintutu iyagu is-afgarasho ka gaadhaan xannaanaynta ubadkooda

Xeerkani wuxuu waalidiinta ku dhiirri gelinayaa inay iskaashadaan oo ka heshiiyaan habkay u xannaanayn lahaayeen carruurtooda. Sida caadiga ah, cid walba ayay u roon

tahay– gaar ahaan carruurta – in waalidiintu iyagu isku afgartaan heshiis shaqaynaya. Faragelinta Maxkamadda wuxuun bay waalidku u baahanayaan markay iyagu dhexdooda ku heshiin waayaan xannaanaynta ubadkooda, isla markaana ku guuleysan waayaan inay xal ka gaadhaan khilaafkooda kaddib marka loo sameeyo latalin Maxkamaddu qaban qaabisay. .

Hadday laba waalid oo iyagu xal isla gaadhay doonayaan, waxay qoran karaan (**parenting agreement) heshiis waalidnimo**, kaas oo tibaaxaya waxay isku af-garteen. Waxay Maxkamadda weydiisan karaan inay goyso **Court order** (amar Maxkamadeed) oo ku salaysan heshiiskay isla gaadheen.

Macluumaad dheeraad ah ka eeg qoraalka ku saabsan **Heshiisyada Waalidnimo**

Maxaa dhacaya markay waalidiintu heshiin kari waayaan?

Hadday waalidiintu isku afgaran waayaan wixii ubadkooda u dan ah, waxay taageero weydiisan karaan Maxkamadda Qoyska. Sida caadiga ah Maxkamaddu waxay marka hore u diyaarineysaa **latalin bilaash ah**, taasoo uu qof u tababaran xirfadda latalintu ka caawinayo inay khilaafkooda ka heshiiyaan.

Macluumaad dheeraad ah ka eeg qoraalka ku saabsan **Counselling (Latalinta)**.

Maxaa dhacaya haddii waalidiintu heshiin kari waayaan latalinta dabadeed?

Haddii latalintu shaqayn weydo, waalidiinta midkood ama labaduba waxay dacwo geysan karaan Maxkamadda Qoyska si loo helo amar waalidnimo. Caadi ahaan Maxkamaddu waxay qabanqaabineysaa **mediation conference (kulan dhexdhexaadin)**. Markaan Xaakim Maxkamadda Qoyska ama dhexdhexaadiye khibrad leh ayaa waalidiinta ka caawin doona inay heshiis gaadhaan.

Macluumaad dheeraad ah ka eeg qoraalka ku saabsan **The Mediation Conference (Kulan Dhexdhexaadin)**.

Dhegeysiyada Maxkamadeed – waa tallaabada ugu dambeysa

Haddii latalinta iyo dhexdhexadinta midkoodna shaqayn waayo, tallaabada ugu dambeysaa waa dhegeysi dacwad Maxkamadeed oo rasmi ah. Gebagebada dhegeysiga dacwadu wuxuu noqon karaa **parenting order** (**amar waalidnimo)** oo Maxkamaddu goyso. Amarku wuxuu ku saabsanaan karaa –

- cidda yeelaneysa **xannaanaynta joogtada ah** ee ilmaha iyo waqtiga, iyo

- haddii hal waalid yeesho xannaanada joogtada ah, goorta iyo habka waalidka kale **xiriir** ula yeelanayo ilmaha.

Sidee Maxkamaaddu go'aanka u qaadataa?

Daryeelka iyo maslaxadda ilmaha ayaa ah waxa koowaad ee ugu muhiimsan oo Maxkamaddu tixgelin siinayso markay ka baaraan degeyso inay go'aamiso amarka waalidnimo iyo waxa uu ka kooban yahay amarkaasi.

Maxkamaddu waxay weydiisan kartaa qof khabiir ahi inuu usoo diyaariyo warbixin ka caawisa go'aankeeda – tusaale ahaan, warbixin khabiir cilmi nafsiga (psychologist) ama warbixin ku saabsan ilmaha asalkiisa dhaqameed. Maxkamadu waxay kaloo warbixin weydiisan kartaa hawlwadeen bulsho oo ka socda Hay'adda Adeegyada Dhallaanka, Dhallinyarada iyo Qoysaskooda (CYFS) .

Waalidku wuxuu Maxkamadda weydiisan karaa inay dhegeysato warbixinta qof uga warrama ilmaha asalkiisa dhaqameed, iyo siday taasi wax ku-ool ugu tahay go'aamada la weydiistay inay Maxkamaddu gaadho.

Macluumaad dheeraad ah waxaad ka helaysaa qoraalka ku saabsan **Parenting Orders (Amarrada Waalidnimo)**.

Fulinta Amarrada Waalidnimo

Haddii mid ka mid ah labada waalid uusan samayn waxa lagu faray amarka waalidnimo, caadi ahaan waxa ugu horreeya ee Maxkamaddu ku dhaqaaqeyso waa inay waalidiinta u dirto **latalin** si ay is afgarasho iyagu uga gaadhaan arrinka.

Haddii taasi shaqayn weydo, xalka ugu dambeeyaa waa in Maxkamaddu kasoo saari karto amarro kala duwan oo ay xaaladda wax uga qabanayso. Tusaale ahaan waxay yarayn kartaa muddada loo oggol yahay inuu waalidkaasi ilmaha haysto; waxay kaloo amri kartaa inuu lacag dibaaji ah Maxkamadda dhigo, taasoo uu waayayo hadduu kusii socdo inuu amarka jebiyo. Macluumaad dheeraad ah waxaad ka helaysaa qoraalka ku saabsan **Breaches of Parenting Orders (Jebinta Amarrada Waalidnimo)**.

Garawshiyaha habab kala duwan oo loogu heshiin karo xannaanaynta carruurta

Maalmahan dambe, waxay carruurta Niyuusiilaan ku barbaaraan noocyo badan oo heshiisyo qoys ah. Tusaale ahaan, waxaa dhacda in ay carruurta xannaaneeyaan labada waalid, xubno xigtadooda ka mid ah ama jifadooda guud, ama same sex partners (waalidiin isku sinfi ah oo is-qaba).

Doorka xigtada iyo jifada guud

Xeerku wuxuu caddeynayaa inay muhiim tahay inuu jiro lana xoojiyo xiriirka ilmaha iyo qaraabadooda guud oo ay ka mid yihiin xigtadooda, reerkooda, jifadooda, tolkood iyo qaybaha kale ee qoyska.

Wuxuu kaloo dhiirri gelineyaa in xubnaha qoyskooda iyo qaraabada guudba kawada qaybqaataan xannaanada iyo korinta carruurta.

Iyagoo oggolaansho ka haysta Maxkamadda Qoyska ayay xubnaha qoyska iyo xigtada kaleba Maxkamadda ka codsan karaan amar waalidnimo.

Waalidiintu waxay u magacaabi karaan kafiil afadooda/odeygooda (partner) cusub

Haddii aabbuhu yeesho xaas cusub ama hooyadu yeelato nin cusub, kaasoo ka caawinayey xannaanada ilmaha ugu yaraan muddo hal sano ah, waxaa waalidka u bannaan inay xaaskooda/odaygooda cusub u magacaabaan kafiil sharciyeysan oo ilmahoodu yeesho. Sida caadiga ah, waa inay oggolaansho arrintaas uga helaan waalidka kale ee ilmaha dhalay.

Hawlwadeenka Maxkamadda Qoysku (Family Court Registrar) waa inuu marka hore hubiyaa in foomka magacaabistu nidaamka waafaqsan yahay. Waa inuu ku qancaa in macluumaad sax ah loosoo gudbiyey, in habka qoraallada loo diyaariyey sax yahay, iyo in sababo hor istaagi kara magacaabistu ayan meesha ku jirin.

Mar qudha ayaa la oggol yahay in kafiil cusub habkaan oo kale lagu soo magacaabo. Haseyeeshee, Maxkamadda Qoyska ayaa codsi loo gudbin karaa inay iyadu dad dheeraad ah u magacawdo kafiil.

Macluumaad dheeraad ah waxaad ka heli kartaa qoraalka ku saabsan **Parents Appointing New Partners as Guardians (**magacaabista waalidiinta ee kafiil cusub).

Hufnaan dheeraad ah ee hawlaha Maxkamada Qoyska

Hordhac

Xeerka cusubi wuxuu dadweynaha u suurto gelinayaa inay aad wax uga ogaadaan waxa ka socda Maxkamadda Qoyska. Isla mar ahaantaana, wuxuu xaqiijineyaa in Maxkamaddu ahaato meel ay waalidka iyo kafiillada carruurtu si ammaan ah oo hufnaan iyo daacadnimo leh uga wada hadli karaan ammuuro shakhsiyeed oo xasaasi ah.

Keenista Maxkamadda dad taageerayaal ah

Hadday waalidiintu kaxaystaan qof caawiya markay u socdaan kulamada latalinta iyo kuwa dhexdhexaadinta – sida xaas/oday cusub, saaxiib ama qof ka tirsan qoyska – Xeerku wuxuu qofkaas u oggolaanayaa inuu xaadiro dhegeysiga dacwada Maxkamada.

Sidoo kale wuxuu Xaakimku u fasixi karaa dad kale inay joogaan dhegeysiga Maxkamadda iyagoo waalidka taageeraya. Macluumaad dheeraad ah ka eeg qoraalka ku saabsan **Kasoo Xaadirista Maxkamadda Qoyska.**

Weriyeyaashu way ka qaybgeli karaan dhegeysiga dacwadaha Maxkamadda

Xeerka cusubi wuxuu weriyeyaasha xaq u siinayaa inay ka qaybgalaan dhegeysiga dacwadaha Maxkamadda Qoyska ee Xeerkan ku salaysan.

Haseyeeshee, waxaa aad loo xakameeyey waxyaabaha ay ka warbixin karaan. Ma daabici karaan wax magac ah ama akhbaar laga yaabo in lagu ogaado dadkey yihiin ilmaha, waalidiinta ama dadka kale ee dacwada ku lugleh – sida dadka iyaga caawinaya iyo markhaatiyada.

XAAKIMKU WUXUU DADKA WEYDIISAN KARAA INAY MAXKAMADDA DIBEDDA UGA BAXAAN

Sidoo kale, wuxuu Xaakimku awood u leeyahay inuu ku amro cid kasta oo aan ahayn qaybaha dacwaddu u dhaxayso iyo garyaqaannadooda inay Maxkamadda dibedda uga baxaan goor kasta oo ka mid ah muddada dhegeysigu socdo.

DAABICIDDA GO'AANNADA

Qaar ka mid ah go'aammada xukun ee ay riddo Maxkamadda Qoysku waxaa sidoo kale lagu daabacaa bogga internetka Maxkamadda (www.justice.govt.nz/family), hase yeeshee magacyada waa laga reebaa si aan loo aqoonsan dadka ku lugleh. Xukun waa go'aan qoraal ah oo xaakim ka gaadhay dacwad gaar ah. Waxaa ku jira sababaha xaakimku go,aankaas u gaadhay iyo mararka qaar faallo la xiriirta qodobbada sharci ee dacwaddaas waafaqsan

*****

Turjubaanno

Maxkamadda Qoysku waxay diyaarin kartaa turjubaan ka qaybgala kulamada latalinta, kuwa dhexdhexaadinta iyo dhegeysiga Maxkamadda. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan arrintaan, kala hadal Iskuduwaha Maxkamadda Qoyska (Family Court Coordinator), ama qof kale oo shaqaale ka ah Maxkamadda Qoyska ee degaankaaga.

Legal aid (Gargaar sharci)

Qofkasta oo garyaqaan u baahan balse aan awoodi karin kharashkiisa waxaa suurto gal ah inuu helo **gargaar sharci** (caawimaad dhaqaale oo garyaqaan lagu kireysto). Tani waa marka dowladdu bixinayso qaar ama dhammaan kharashka garyaqaanka (mararka qaar waxaa laga yaabaa inaad qayb ka mid ah kharashka ama dhammaantiis dib u soo guddo).

Waxaad ku heli kartaa macluumaadka gargaar sharci adigoo –

- la xiriira xafiiska Legal Services Agency (Hey'adda Adeegyada Sharci) ee degaankaaga (sidoo kale eeg bogagga buluugga ah ee dowladda oo xagga hore kaga yaal buugga taleefoonada)
- booqda bogga shabakada Internetka ee Legal Services Agency www.lsa.govt.nz, or
- arka garyaqaan oo kala hadla gargaarka sharci.

Gargaarka sharci wuxuu u furan yahay dhammaan dacwadaha Maxkamadda Qoyska, marka laga reebo furniinka.

Miyaad u baahan tahay talo ama macluumaad dheeraad ah?

Macluumaad dheeraad ah ama talobixin ku saabsan Xeerka 2004 ee Xannaanaynta Carruurta (Care of Children's Act), eeg bogga shabakada Internetka ee Maxkamadda Qoyska (www.justice.govt.nz/family), la xiriir garyaqaan arrimaha qoyska

(www.familylaw.org.nz), rugta garyaqaanada bulshada caawiya (community law centre), ama xafiiska kuugu dhow ee Maxkamadda Qoyska.

Dhashaada ayaa mudnaanta la siinayaa